





Xafiiska ayaa isticmaalaya  
oo keliya

HH:

Tixraac

Rep#:

Xaddiga deeqda:

Bedelkeeda Ka codso khadka tooska ah

[mn.gov/home](https://mn.gov/home)



Fadlan isticmaal khad madoow si aad ugu buuxiso codsigaaga. Dukumeentiyada aad dirayso ha u isticmaalin calaamadeeyayaal.

## CODSIGA BARNAMIJKA TAMARTA EE MINNESOTA 2023-2024

/ P S U I M E S O M S / 4 V J U F  
# S P O L M E S L  
D B Q I F O O F Q J O P S H P S F B Q I D B Q I F O O F Q J O P S H

Ka hor intaadan buuxin codsigan, si taxaddar leh u akhri "Masuuliyadahaaga iyo Xuquuqdaada" ee ku lifaaqan iyo tilmaamaha.

**Qaybta 1. Macluumaad Shaqsiyeed** - Xaqiiji in dhammaan xogta codsigan horey ugu daabacnayd ay saxan tahay. Isbedelada sida la rabo u samee.

<b>Lambarkaaga Amniga Bulshada (SSN)</b>	<ul style="list-style-type: none"><li>Lambarada Amniga Bulshada (SSNs) ayaa laga rabaa dhammaan xubnaha qoyska waana la hubin doonaa</li><li>Haddii aan SSN ansaxa lahayn, dukumeenti nooc kale ah ayaa la rabaa</li><li>Haddii xubnaha qoyska midkood yahay ajaanib aan barnaamijka u qalmin, waxa laga yaabaa in qoyskaagu weli heli karo kaalmada haddii 1 ka mid ah xubnaha qoyska yahay muwaadin ama ajaanib barnaamijka u qalma.</li><li>SSN-kaaga waxaanu u isticmaali doonaa si aanu u helno macluumaadka cayrta shaqo-la'aanta</li></ul>
--	---

<b>Magaca Sharciga ah:</b>	BB- MM- SSSS
----------------------------	--------------

Magaca Koobaad	M.I.	Magaca Dambe	Taariikhda Dhalashada
----------------	------	--------------	-----------------------

<b>Cinwaanka Meesha Aad Hadda Ku Nooshahay</b>	<b>Cinwaanka Boostada (hadduu ka duwan yahay halkaad ku nooshahay)</b>
--	--

Lambarka Guriga iyo Dariiqa	Dariiqa ama Sanduuqa Boosta
-----------------------------	-----------------------------

Magaalo	<u>MN</u>	Gobolka	Zip Code	Maamul
Magaalo		Zip Code		Maamul

<b>Luuqadda Aad ku Hadasho:</b>	<b>Taleefanka Koobaad:</b> (.....)	<b>Taleefan Kale:</b> (.....)
	<input type="checkbox"/> Taleefanka gacanta	<input type="checkbox"/> taleefanka gacanta

<b>Iimayl Ciwaanka:</b>	<b>Si la iigula soo xiriiro Qoraal, waxaan door bidayaa: (Dooro mid qura)</b> <input type="radio"/> Boostada Maraykanka (Waraaq) <input type="radio"/> iimayl
-------------------------	--

**Wakiil Idman:** Haddii aad buuxiso qaybtan, "Wakiil Idman" ayaa ogolaansho u haysta inuu ku metelo balse ma saxiixi karo codsiga illaa iyo isagoo sharcian loogu idmo inuu sidaas yeelo maahane, (tusaale, Qareen uu Awood u Siiyo, Masuul ama Ilaaliye ah). Dukumeentiyada wakiilka soo raaci codsiga.

Magaca koobaad	Magaca dambe	Taleefan
----------------	--------------	----------

Waxaan rabaa in **Wakiil Idmani** waraaqdeyda boosta helo isagoo i metelaya  (haddii aad saxdo, cinwaankiisa halkan hoos geli.)

Dariiqa ama Sanduuqa Boostada	Apt #	Magaalo	Gobol	Zip Code
-------------------------------	-------	---------	-------	----------

**WAA INAAD CODSIGAN KU SAXIIXDAA OO KU TAARIIKHAYSAA GUNTA HOOSE EE BOGGA**

## Qaybta 2. Macluumaadka qoyska

Liistee dhammaan xubnaha qoyska, adiga oo adigu isku bilaabaya (waalidiinta caruurta dhalay ee aan haysan waxay ku dari karaan caruurtooda yaryar):

LOO BAAH AN			6-DII BILOOD EE U DAMBEYSAY		Taariikhda ugu dambeysay ee Shaqaaleysii nta BB - MM - SSSS	Jinsiga Ku qor Tus: Lab	Sinji Eeg Hoose	Latino/a/x	Hisbaanik	Naaf ah	Halvey
Lambarka Amniga Bulshada Tus: 555-55-5555	Magaca Sharciga Magaca Hore M.I. Dambe Tus: Pat T. Smith	Taariikhda Dhalashada bb-mm-ssss	Dakhli/Gun oyin	Tirada shaqaalaha							
(Aniga)		- -								Y/N	Y/N
		- -									
		- -									
		- -									
		- -									

**Ku soo lifaaq waraaq dheeraad ah haddii loo baahdo si aad ugu qorto xubnaha qoyska ee dheeraadka ah.**

<b>Sinji:</b>	<b>A</b> = Eeshiyani <b>B</b> = Madow ama Afrikaani Maraykani	<b>I</b> = Hindi Mareykani ama Dhaladka Alaska
	<b>P</b> = Dhaladka Huwaay ama Aylanderada Baasifiga ee Kale	<b>W</b> = Caddaan <b>M</b> = Jinsiyo Badan <b>O</b> = Kale

- Miyaa xubnaha qoyskaaga mid ka mid ah dakhligiisu yaraaday 6-di bilood ee ugu dambeysay? Kuma.....  
*Qof walba oo qoyskaaga ka tirsan, soo dir dakhliga bisha oo dhammaystiran. Eeg tilmaamaha wixii macluumaad dheeraad ah.*
- Miyay jiraan xubno ka weyn +18 oo aan dakhli lahayn? Xubnahee? Fadlan sababee.....
- Ma doonaysaa inaad is diiwaangeliso si aad u codayso ama inaad beddesho diiwaangelintaada haddii aad guurtay?  Haa  Maya
- Miyuu qof qoyskaaga ka mida hadda yahay shaqaale ka shaqeeya ama xubin boor ka ah haayadda taageerada tamarta?  Haa  Maya
- Sidee baad ku maqashay barnaamijka Taageerada Tamarta?**  Asxaabta/Qoyska  Jaraa'id  Tabeelle  Baraha Bulshada/Xayaysiin Dhijitaal ah  Raadiye  Kireeye  Shaqaalaha Maamulka  Xafiiska Halyeyada  Websaydka Gobolka ama Maamulka  Shidaal/Adeeg Keene  Kale.....

**Dakhli, Gunnooyin, iyo kaalmooyinka kale:** hal bil kalandar ee u dambeeyay ka hor intaadan saxiixin codsigan, hubi dhammaan kuwa ku habboon xubin kasta oo qoyskaaga ka mid ah. Fadlan liis garee dhammaan dadka leh nooca dakhliga ama dheefaha agtooda **soona raaci** codsigan.

<b>Dakhliga</b>	Kumaa leh dakhligan	Kumaa leh dakhligan
<input type="checkbox"/> Mushaharo	-----	
<input type="checkbox"/> Isu-shaqayn*/Dakhliga Beerta/Qandaraas/Shaqo madax banaan/Mushqaayad	-----	<input type="checkbox"/> Cayrta Shaqo-la'aanta
Sannadka iyo bisha la bilaabay:.....		<input type="checkbox"/> Dakhliga Dulsaarka ama Faa'iido Qaybsiga
<i>Soo dir 2-da bog ee u horreeya iyo Jadwalka 1 ee cashuur celiskaaga u dambeeyay ee IRS-1040</i>		<input type="checkbox"/> Dakhli Kiroole
<input type="checkbox"/> <i>Ma jiro dakhli: Fadlan naga soo wac</i>		<input type="checkbox"/> Magdhowga Shaqaalaha
		<input type="checkbox"/> Qandaraaska Maalgashiga Dulsaarka
		<input type="checkbox"/> Kuwo kale
<b>Gunnooyin</b>	Kumaa leh dheeftan	Kumaa leh dheeftan
<input type="checkbox"/> Gunnooyinka Amniga Bulshada (SSDI, RSDI, SSA)	-----	<input type="checkbox"/> Gunnooyinka Halyeyada
<input type="checkbox"/> Dakhliga Amniga ee Dheeraadka ah (SSI)	-----	<input type="checkbox"/> Lacagaha Qabiilka Qofku Siyo
<input type="checkbox"/> Bisilka/Lacagta Dadka Waaweyn (ay ku jiraan rubucle & sannadle)	-----	<input type="checkbox"/> Lacagaha Xukunada Qabiilka ama Bakhshiishka Qabiilka
<input type="checkbox"/> Dakhliga Hawlgabka (oo uu ku jiro Dakhliga IRA, iwm.)	-----	<input type="checkbox"/> Naafnimada Muddada Dheer/Gaaban
<input type="checkbox"/> Barnaamijka Maalgashiga Qoyska (MFIP ama TANF)	-----	<input type="checkbox"/> Taageerada Laamanaha ama Furriinka ka dib
<input type="checkbox"/> Taageerada Guud (GA) – <b>Gunnooyinka Naqadka ah</b>	-----	<input type="checkbox"/> Shaqooyinka Leexsan (DWP)

### Wax caddeyn dakhli ah looma baahna:

- Taageerada Ilmaha -  Lacagaha Billaha ah\$.....
- Taageerada Cuntada  Deynta Cashuurta Dakhliga la Kasbaday
- Taageerada Dheeraadka ah ee Minnesota (MSA)

**Codsigaaga dib ayaa loo dhigayaa haddii aadan soo raacin dhammaan caddeymaha dakhliga ee la rabo.**

### Qaybta 3. Macluumaadka Guriyaynta

Waxaan ku nool nahay:  Guri  Abaarman/Koondo  Guri-dawladeed  Guri Socda  Duplex  Triplex  Fourplex  Kale.....

Illaa intee ayaad ku noolayd gurigaaga hadda? ..... Sannadood ..... Bilood Immisa qof ayaa ku nool gurigaaga?.....

Waxaan bixiyaa:  Kiro  Deyn Guri  Kirada booska  Ma baxsho lacag bille ah. Haddii aad lacag bixiso, dakhliga billaha ah ee lagaa rabo waa imisa: \$ ..... **baa la iga rabaa**

<p><b>Waxaan ahay kireyste:</b> Ma hesha kaabis kiro miyaadse ku nooshahay guri la kaabo? <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya Kharashka kuleylinta ama korantadu miyay ku jiraan kirada? Sax kuwa ku habboon: <input type="checkbox"/> Kuleylinta <input type="checkbox"/> Koronto</p> <p><b>Macluumaadka Kireystaha</b> Magac:..... Taleefan (.....)..... Dariiqo ama Sanduuqa Boosta..... Apt#..... Magaalo..... Gobol..... Zip Code.....</p>	<p><b>Waxaan leeyahay guri:</b> Miyaad leedahay ama aad gadan rabtaa gurigaaga? <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya Haddii nidaamka kuleylinta/foornada gurigaagu <b>AANU</b> hadda shaqeynayn, sax sanduuqan: <input type="checkbox"/> Isla markiiba naga soo wac haddii aanu nidaamka kuleylinta/foornadu shaqeynayn.</p> <p><b>Kireystayaasha iyo Mulkiilayaasha guryaha:</b> Haddii aad adigu isu-shaqeyso, ganacsiga ma gurigaaga ayaad ka waddaa? <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya Haddii ay <b>Haa</b> tahay, waa maxay nooca ganacsiga iyo shaqada aad ku qabato gurigaaga? ..... Gurigaaga qayb ka mid ah miyaad cid kale ka kireysaa? <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya Taangigaaga shidaalka ama saacadda korontada miyaad cid kale la wadaagtaa? <input type="radio"/> Haa <input type="radio"/> Maya</p>
--	---

### Qaybta 4. Tamar Bixiyayaasha

#### Shirkadahee ayaa gurigaaga siiya korontada iyo Kuleylinta?

Nuqul biilashaadii u dambeeyay iyo/ama rasiidhadii shidaalka ah noo soo raaci codsigan.

Kaalmada biyuhu lama heli doono laga bilaabo august 30, 2023

	Kuleylinta Guud	Kuleylinta Kale	Koronto	Tamarta Cadceedda
Magaca Shirkada				
Shidaal Nooca:	<input type="radio"/> Gaasta Dabiiciga ah <input type="radio"/> Borobayn <input type="radio"/> Saliid <input type="radio"/> Shidaalka noolaha <input type="radio"/> Uumi	<input type="radio"/> Gaasta Dabiiciga ah <input type="radio"/> Borobayn <input type="radio"/> Saliid <input type="radio"/> Shidaalka noolaha <input type="radio"/> Uumi	<input type="checkbox"/> Isha Kuleylinta guud waa koronto	
Lambarka Xisaabta:				
Magaca Xisaabta Ku Qoran:				

Illaa iyadoo hoos lagu muujdo maahane, gunnadaada waanu kala qaybin doonaa. 70% waxa la siin doonaa shirkadaada kuleylinta guud 30% iyana waxa la siin doonaa shirkadaada korontada.

**IKHTIYAARI:** Haddii aad rabto in gunnadaada in si sidan ka duwan loo baxsho, hoos ku muuji:

Dhammaan ku bixi kuleylinta guud  Dhammaan ku bixi korontada  Kale:.....

**Haddii aad kuleylinta u isticmaasho xaabo ama shidaal noole oo kale:**  
Shidaalka noolaha aad isticmaasho -  Xaabo  
 Qurubo  Galley  Wax Kale  
Boqolkiiba kuleylintaada intee ayay tani soo saartaa?.....%  
Immisa qol hurdo ayuu gurigaaga ka kooban yahay?  
Ma adigaa keensada xaabadaada/galleydaada?  Haa  Maya

#### Gargaarka Degdegga ah Tamarta

Haddii aad hadda wajahayso xaalad degdeg ah, ka dooro nooca xaaladda hoos oo noo soo dir nuqul ogeysiiska ah:

Horey looga jaray. Shirkadda:..... Taariikhda la jaray:.....

Helay ogeysiiska jarista. Shirkadda:..... Taariikhda la qorsheeyay:.....

Taangiga shidaalka oo maran (ama ay ku jiraan wax ka yar 20%) oo ay la socoto lacagta iyo keenista. Waa maxay % ee ku jiraa taangigaaga manta..... cabirka taangiga .....

La xiriir shirkadaada tamarta si aad u dejisaan qorshaha aad lacagta ku bixineyso.

**Qaybta 5. Ogotanashaha iyo saxiixa Oktoobar 1, 2023 illaa Sibteembar 30, 2024**

- 1 Waxaan shirkadahayga adeegyada kuleylinta iyo korontada ogolaansho u siiyay inay xogta xisaabtayda iyo isticmaalkayga korontada siiyaan Waaxda Ganacsiga ee Minisoota (Ganacsiga) iyo Qandaraaslayaasha Ganacsiga si loogu adeegsado Barnaamijka Taageerada Tamarta (EAP), Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP) iyo Barnaamijka Horumarinta Tamar-tashiilka.
- 2 Waxaan u ogolaaday Maamulka Amniga Bulshada, Waaxda Adeegyada Aadamaha ee Minnesota iyo wakaaladaha la xulafada ah, iyo Waaxda Shaqaaleynta iyo Horumarinta Ganacsiga ee Minnesota inay xogtayda khuseysa Lambarka Amniga Bulshada, gunnooyinka dadwaynaha ee aan helo, iyo dakhligayga sannadkii u dambeeyay si Ganacsiga iyo qandaraaslayaasha Ganacsigu ugu adeegsadaan EAP, WAP, iyo CIP.
- 3 Waxaan EAP, WAP, iyo CIP-da Minnesota u ogolaaday inay:
  - La xiriiraan cidda aan u shaqeeyo si ay u xaqiijiyaan dakhligeyga.
  - La xiriiraan mulkiilaha guriga aan ku jiro si u xaqiijiyaan Meesha aan deganahay iyo/ama isha aan kuleylka ka helo haddii aan kireyste ahay.
- 4 Waxaan Adeeg Bixiyayaashayda EAP, WAP, iyo CIP u ogolaaday inay igala soo xiriiraan wixii xiriir dheeraada iyo sii gudbin ah.
- 5 Markaan saxiixo, waxaan qirayaa in dhammaan xogta codsigan ku jirta ay sax tahay. Waxaan sidoo kale qirayaa in:
  - Aan hadda deganahay cinwaanka ku qoran codsigan.
  - Aan saxiixayo codsiga aniga oo metalaya dhammaan xubnaha qoyskayga.
  - Ay dhici karto in la iga dalbado inaan caddeeyo bayaanadeyda.
  - Ay dhici karto in si waafaqsan shuruucda federaalka ama gobolka la igu soo oogo dambi madani ah ama mid maxkamadeed haddii aniga oo og aan macluumaad been ah ama been-abuur ah sameeyo.
  - Waxaan leeyahay xuquuqaha ku jira EAP, WAP, iyo CIP. Waxaan helay nuqul "Ogeysiiska Asturnaanta iyo Xuquuqaha iyo Masuuliyada ah" oo waan aqbalay shuruudihiisa iyo sharciyadiisaba.
  - Rafcaan ayaan ka qaadan karaa go'aamada Bixiyaha Adeegga Taageerada Tamareed ee ku saabsan gunnooyinkayga.
  - Waan fahamsanahay in macluumaadka maqani uu daahin karo go'aaminta inaan u qalmo kaalmo.
  - Waan fahamsanahay in Adeeg Bixiyahaygu uu awoodi karo inuu iga caawiyo bixinta kharashka tamarta ee muddo dhaafay iyo/ama inuu ila sameeyo qorshe aan lacagta ku siiyo shirkadaha tamarta.
  - Waan fahamsanahay in buuxinta codsigani aanay dammaanad qaadeyn in qoyskaygu heli doono taageero.
  - Waxaan ahay qof weyn, qof yar oo masuul ah, ama qof yar oo madaxii qoyska ah oo aan la nooleyn wax dad waaweyn ama qof yar masuula ah.

**Magaca Daabacan:** :.....:

**Saxiixa:** ..... **Taariikhda Maanta:**.....:

**Dhammaan codsiyada waa in boosta la soo dhigaa ama EAP ay helaan May 31, 2024 ama ka hor.**

**Codsigaaga waa in boosta lagu soo dhigaa muddo 60 beri gudahooda oo ka bilaabmeysa taariikhda aad saxiixday.**

**Hore u codso, lacagtu way dhammaan kartaa.**

# Ogeysiiska Asturnaanta iyo Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga.

## Ogeysiiska Asturnaanta

**Qodobada Xeerka Asturnaanta** Shuruucda federaalka iyo kuwa gobolka ayaa naga raba inaanu kuu sheegno xuquuqdaada iyo masuuliyadahaaga ka hor intaan ka uruurin macluumaad loo aqoonsaday inay khaas ama sir yihiin. Foomkani wuxu ku siinayaa macluumaad u hogaansan Xeerka Asturnaanta ee Federaalka ee 1974 1974, 5 U.S.C. § 552a(e)(3) iyo Xeerka Dhaqamada Xogta Dawladda ee Minnesota, Minn. Stat. § 13.04, subd. 2 (oo sidoo kale loo yaqaan digniinta Tennesen).

Fadlan si taxaddar leh u akhri *Ogeysiiskan Asturnaanta* ka hor intaan buuxin oo saxeehin *Codsiga Barnaamijka Tamarta ee Minnesota*, oo *Ogeysiiskan Asturnaanta* keydso si aad mustaqbalka u isticmaashid. Ogeysiiskan Asturnaanta wuxu ku dabbagmayaa Barmaajika Taageerada Tamarta (EAP), Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP), iyo Barmaajika Kor-u-qaadista Tashiilka (CIP), oo sidoo kale loo yaqaan Barnaamijyada Tamarta.

### Waa maxay sababta aanu codsiga macluumaad ugu uruurino?

Waxaanu macluumaadkaaga u adeegsan doonaa inaanu ku baarno, ku qiimeyno oo ku maamulno Barnaamijyada Tamarta.

Macluumaadka waxaanu ugu baahanahay:

- Inaanu dadka kale kaaga aqoonsanno.
- Inaanu ku ogaano inaad kaalmo u qalanto.
- Inuu noo sahlo inaanu kaalmadaada u helno lacago federaal ama gobol.
- Si aanu u buuxino shuruudaha warbixinta gobolka ama federaalka.

### Ma kugu waajibaa inaad na siiso macluumaadka?

Waxaad xaq u leedahay in aadan na siin macluumaadka aanu ku waydiino.

### Maxaa dhacayaa haddii aad macluumaad na siiso ama na siin waydo?

Haddii aad na siiso macluumaadka lagu dhex codsaday codsiga, codsigaaga waa laga shaqeyn doonaa. Haddii aad na siin weydo macluumaadkaas:

- Codsigaaga lagama shaqeyn doono.
- Waxa laga yaabaa inaad helin adeegyada.
- Waxa laga yaabaa inaad heli kaalmada kharashka tamarta.
- Waxa laga yaabaa in adeegyadaadu dib u dhacaan.

Waanu hayn doonaa macluumaad kasta oo aad na siiso, codsiga haddii la aqballo iyo haddii aan la aqbalinba.

### Yaa laga yaabaa inay arkaan codsigan?

Dadkan soo socda ayaa laga yaabaa inay helaan macluumaadka ku jira codsigaaga Barnaamijyada Tamarta haddii: (i) ay u baahdaan inay helaan macluudka codsiga si ay u qabtaan shaqadooda la xiriirta Barnaamijyada tamarta (EAP, WAP, iyo CIP), ama (ii) uu si kale sharciga federaalka ama gobolku awood ugu siiyay inay arkaan, ama (iii) ay macluumaadka u adeegsanayaan ujeedooyin warbixaneed, cabbirista natiijooyinka, sii gubin ama u qalmiseed.

- Bixiyayaasha Adeega Barnaamijyada Tamarta ee Maxalliga ah oo ku shaqeynaya qandaraaska ay kula jiraan Waaxda Ganacsiga ee Minnesota (Ganacsiga).
- Qaybta Deeqaha ee Adeegyada Bulshada Minnesota iyo Bixiyayaasha Adeegyada Deeqaha Bulshada ee Minnesota oo ku shaqeynaya qandaraaska ay kula jiraan Ganacsiga.
- Hanti-dhowrayaasha barnaamijka si waafaqsan hagitaanka Xafiiska Maamulka iyo Miisaaniyadda (OMB).
- Waaxda Maamulka ee Minnesota, Ganacsiga, Waaxda Shaqaaleysiinta iyo Koboca Dhaqaalaha, Caafimaadka, Wakaaladda Maalgelinta Guriyaynta, Adeegyada Adamaha, Adeegyada Dakhliga iyo MN.IT.
- Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Adamaha iyo Tamarta ee Maraykanka.
- Guddidda Adeega Bulshada ee Minnesota.
- Kormeeraha Sharciga ee Minnesota.
- Shaqsiyaadka loogu ogolaaday si waafaqsan amar maxkamadeed.
- Shirkadahaaga tamarta oo u isticmaalaya (go'aaminta) waxaad iska bixin karto iyo Barnaamijyada Tamarta.
- Iskaashiga Bulshada Minnesota (Minnesota Community Action Partnership).
- Maamulka Amniga Bulshada ee Maraykanka.
- Wakaaladaha ama hay'daha kale ee sharciga federaalka ama gobolku u ogol yahay.

### Maxaan u uruurinaa Lambarada Amniga Bulshada?

Waxaanu Lambarada Amniga Bulshada u adeegsanaa maamulka Barnaamijyada Tamarta (EAP, WAP, iyo CIP) si aanu u hubino in codsadayasha iyo xubnaha qoyskoodu ay helaan keliya gunnooyinka la ogol yahay. Sharciga federaalka ayaa noo ogol inaan kaa dalbano inaad sheegto Lambarkaaga Amniga Bulshada si aanu uga shaqeyno codsigaaga oo aanu uga hortagno, una saxno been abuurka iyo si xun u adeegsiga. OGOLAANSHAHA: Qaybta 205(c)(2)(C)(i) ee Xeerka Amniga Bulshada, 42 U.S.C. § 405(c)(2)(C)(i). Dhammaan codsadayasha (marka laga reebo ajaanibka u qalma) waxa laga rabaa inay bixiyaan Lambarka Amniga Bulshada oo la xaqiijin karo si looga shaqeeyo codsigooda.

### Maxaan u waydiinaa macluumaad ku saabsan jinsigaaga?

Kani waa macluumaad ikhtiyaari ah. Waxa loo qoraa loona kaydiyaa ujeedooyin tiro-koob oo keliya dartood. Barnaamijku cidna kuma faquuqi karo sabab jinsi, qawmiyadda laga soo jeedo, diin, sinji, fikir galmo, ama xulaf siyaasadeed.

# Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga

Waxaad xuquuqo gaar ah u leedahay inaad kaalmo

hesho:

Waxaad xaq u leedahay:

- Inaad markale soo codsato haddii lagu diido.
- Inaad kaalmo dheeraad ah codsato haddii aad u baahan tahay.
- Inaad ogaato shuruucda iyo sidaan u go'aamino cidda kaalmada helaysa.
- Inaad jawaab ku hesho waqti macquul ah ka dib markaad soo gudbiso dhammaan macluumaadka.
- Inaad rafcaan ku qaadato muddo 30 beri gudahood ka dib marka lagu soo diro natijada codsigaaga haddii:
  - Aad hesho warqad diidmo ah oo aad u maleynayso inaanu isticmaalnay macluumaad khaldan si aanu go'aanka u gaarno.
  - Aadan heli kaalmadii lagu ballan-qaaday.

## Waxaad leedahay masuuliyadahan:

Waa inaad noo sheegtaa haddii aad adiga ama qof qoyskaaga ka mid ahi:

- Helay kaalmo biilasha tamarta ah jiilaalka qaybtiisii hore.
- Uu u guuray ciwnaan cusub (noogu sheeg 30 beri gudahood oo guurista ka bilaabantay)
- Aad bedeshay cidda shidaalka ama gaasta kuu keenta ama shirkadda korantada.

**Waxa laga yaabaa in barnaamijka bixiyo keliya qayb biilashaada kuleylinta iyo korontada ah. Adiga ayaa ka masuul ah inaad bixiso haraaga.**

## Ka warran haddii aad fileyso in macluumaadka galkaaga ku jiraa uu khaldan yahay?

Kala hadal Adeeg Bixiyahaaga EAP ee maxalliga ah waxa aad u maleynayso inuu ka khaldan yahay galkaaga.

## Maxaa dhacaya haddii aad bixiso macluumaad khaldan?

Adeeg Bixiyahaaga EAP ee maxalliga ah ama Waaxda Ganacsiga ee Minisoota waxay eegi karaan oo hubin karaan macluumaad kasta oo ku jira codsigaaga ama si kale lagu baxshay. Gunnooyinka Barnaamijka Tamarta waa lagu diidi karaa haddii aad bixiso macluumaad kala dhiman ama been ah. Waxa dhici karta in si waafaqsan shuruucda federaalka ama gobolka laguugu soo oogo dambi madani ah ama mid maxkamadeed haddii adiga oo og aad macluumaad been ah ama been-abuur ah soo raaciso codsigaaga.

## Sida cabasho loo soo gudbiyo:

Haddii aad u maleynayso in lacagbixintaada tamartu aanay ahayn sidii laga rabay ama aadan helin adeegyadii aad filaysay inaad hesho, waxaad la xiriiri kartaa Adeeg Bixiyahaaga EAP ee maxalliga ah ee ku qoran codsiga. Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabtooda, waxaad warqad rafcaan ah u qori kartaa Adeeg Bixiyaha EAP ee maxalliga ah. Kaydso cinwaankooda iyo lambarka taleefankooda.

Haddii aadan ku qanacsanay jawaabtooda rafcaankaaga, warqad u qor:

Sarkaalka Rafcaanada  
Barnaamijka Kaalmada Tamarta  
Waaxda Ganacsiga ee Minisoota  
85 East 7th Place, Suite 280  
St. Paul, MN 55101-2198

Haddii si dadka kale ka duwan laguula dhaqmay sababo midabkaaga, jinsigaaga, dhalshadaada asalka ah, diintaada, sinjigaaga, da'daada, xaalkaaga guur, siyaasadaha aad rumaysan tahay, naafonimadaada jireed ama maskaxeed daraadeed, warqad u qor kuwan soo socda midkood:

Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee  
Minnesota  
Grigg's Midway Building  
540 Fairview Ave. N, Suite 201  
St. Paul, MN 55104  
<https://mn.gov/mdhr/>

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada  
Aadamaha ee Maraykanka  
-AMA- Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah, Gobol V  
233 North Michigan Avenue, Suite 1300  
Chicago, IL 60601  
[www.hhs.gov/ocr/civilrights/complaints](http://www.hhs.gov/ocr/civilrights/complaints)